# Golaha Wakiilada JSL

## Waaxda Hadal Qoraalka

**Opened: - 9:53 AM** **Hansard No.23/01** **Kal-fadhiga 23[aad]**

**Fadhigii 4[aad]** **Taariikhda 24/12/2013**

## ***Doodda Qorsha Hiigsiga 3da Sano ee Golaha Wakiilada oo socotey 2 maalmood kana qeyb-galeen 14 Mudane.***

**C/raxman Maxamed C/laahi (Cirro) Gudoomiyaha:-** waxaa Mudanayasha loo qeybiyay nuqulkii Qorshaha Hiigsiga Golaha, Gudidii soo diyaariseyna Warbixin shaley Golaha ka siisay, mudanayaal ayaa isu diiwaangaliyay dooda Qorshaha, markaa maanta waxaynu u balansanayn doodii waxaana ku soo dhoweynayaa:-

1. **Md. Naasir X. Cali Shire:-** Gudoomiyaha iyo Dhamaan Mudanayaasha salaanta islaamkaan idinku salaamaya, waxaan u mahadnaqayaa Gudiddii hawsha soo qabatay oo si fiican u soo shaqeysay iyo cidkasta oo gacan ka geysatay, waxaa uu qorshahani tilmaamayaa ilaa 10 bartilmaameed oo uu ka hadlayaa, waxaan soo jeedinayaa oo aan halkaa ku dari laha runtii baarlamaankeenu siduu u dhisanyahay ee u shaqeeyo way ka duwanatahay sida baarlamaanada kale ee Caalamku u shaqeeyaan.

   markaa waxaa ku dari lahaa **bartilmaameed 11[aad]** oo ah marka laga hadlayo sifada loo yaaqaano Shir-gudoonka oo ah gudoomiyaha iyo ku xigeenadiisa laakiin caalamka aadan arkayn wax la yidhaahdo Shir-gudoon ee ay jirtoo wax la yidhaahdo Gudoomiye oo kaliya oo awood badan leh oo shaqadiisa si fiican u gudanaya hadii ku xigeeno marka loo baahdo ee Gudoomiyuhu maqan yahay shaqadooda guta iyana, xataa qaab xisaabeed bay leeyihiin u gaar oo waxaa jira hanta-dhowre uu baarlamaanku leeyahay (auditor), sidoo kale waxay leeyihiin meel wax lagu xidho oo ay awood u leeyihiin intay qofka ay doonayaan qabtaan xidhaan oo qaab dhismeedkooda ku jira.

   Marka waxaan halkaa ku kordhin lahaa in qaab dhismeedka baarlamaakeenu uu noqdo mid la jaanqaada kuwa caalamka la jaan qaada oo xataa qaab xisaabeedkeenu uu noqdo mid hufan, sida darted waxaan ku darayaa toosinta iyo hagaajinta waxa la yidhaahdo Qaab dhismeedka Golaha Wakiilada iyadoo

la casriyeynayo iyo toosinta Qaab Xisaabeedka Golaha oo isna halkan ka maqan in lagu daro.

Waxa kale oo iyadana ku dari lahaa Qodobka Ujeedooniynka, **Ujeedada 4aad** oo noqoneysa **awooda Wakiilnimo ee Golahan ee shacabkii soo doortey** (constituency) oo meeshii lagaa soo doortey oo aan ka dhigi lahaa bartilmaameedka 4:1 oo lagu daro talaabooyinka la qaadayo waxaana ku dari lahaa in Xildhibaanada Gobolada tagaya loogu daro Miisaaniyad kharash markay u baxayaan Goboladii iyo Goobihii laga soo doortey, oo ah ninka xildhibaanka ahi meeshii laga soo doortey uu xafiis ka sameeyo uu hawlmaalmeedka dadkii soo doortey uu ugu shaqeeyo iyo hawlaha ay u baahanyihiin.

2. **Md. Aadan Muxumed Hoori (Mataan):-** anigu waxaan ku raacsanahay sida Gudidda u soo sameysay ee C/raxmaan halkan inooga akhriyay.
3. **Md. Ibraahim Axmed Raygal:-** Salaan ka dib, wax aad u badan ma hayo, anigu waxaan ka mid ahaa markuu gudiddaasi ka shaqeynaysay Mudanayashii lagu marti qaaday oo xoogaa dhageysanayay, waxaan halkaa arkay arrin cusub oo ah hawsha gashay Qorshahn sameyntiisa oo ka mid ahayd shir-gudoonka, Mudanayasha Golaha ee Gudidda loo direy iyo Shaqalaalaha Golaha oo Xoghayaha Guud ugu horeeyo iyo Khabiir Wasiir ka noqotey Canada oo 20 sanadood ka shaqeysay arrimahan oo khibiirnimo la inoogu keenay, waxaas oo dhan markaan eegay waxaan u arkay Qorshahan inay gashay wakhti iyo khibrad badan.

   **Sidaa darted waxaan soo jeedinayaa:-**

   - Dood ka dib markaynu waajibkeena ka gudano inay tixgalino hawshaa iyo awooda gashay.
   - Sidii aynu u daba galilahany Constituency ilaa heer qaran inay noqoto wax inteynu sii joogno ku sii shaqeyno kuwa inaga dambeeyana aynu uga tagno oo u noqonaya dhaxal wanaagsan, waxaan u arkaa inay tahay tayaynta waxay Capacity building ka u naqaano ee Golayaashu ku shaqeeyaan, intaas ayaan ku soo koobayaa.

4. **Md. Ibraahim Mahdi Buubaa:-** Mudane Gudoomiye iyo Mudanyaaalba waad salaamantihiin, sidaa laga wada dhawaajiyay Qorshahan cusub malaha waxay ku fiicnayd markii aynu Golaha bilaabeynay inaynu la bilowno oo ku

shaqeyno, ma dhicin waxyaabihii aynu intaa tabeynay ayaa halkan ku yaal, maantaba haday hirgashay waa guul, in dadka inaga dambeeya ay u noqoto dhaxalna waa arrin weyn.

Waxaan jecelahay Gudiddii ka soo shaqeysay waan u mahadnaqayaa waxaana leeyahay sidaa la sheegay in qorshahani aha wixii inaga maqnaa ee sidaan u shaqeyn lahayn waana soo dhoweynaya inaynu ku shaqeyno oo waa loo baahanyahay anigoon hadalkayga badinayna waan ku raacsanahay Gudidii ka soo shaqeysay, waana u mahadnaqayaa.

5. **Md. Xuseen Ismaaciil Yuusuf:-** Gudoomiye, Mudanayaal iyo Marti sharaftaba waan idin salaamaya, anigu waxaan ka mid ahaa Gudidii markii ugu horeysay loo saaray ee seminaarka ama aqoon isswaydaarsiga loogu qabtey aad baanu u akhrinay waana wax aad iyo aad loogu baahanyahay waxaana isleeyahay 50% shaqadii baarlmaanku tabayay halkan ayay ku jirtaa, waxaan leeyahay si wanaagsan ha looga soo baaraan dago, ansixino oo dabadeed isaga ku socon waayo waa hogaan.

   Isaga waynu eegaynaa bal sida luuqada loo soo turjumay marka nuqulka ingriiska ah la inoo qeybiyo halala akhriyo, waxaan leeyahay Markaa waxaa waxaynu u baahnayn oo illaahay inoo keenay maynaan tabina, Markaa aynu ka doodno ka dibna aynu ansixino, waad mahadsantihiin.

6. **Md. Axmed Barkhad Obsiiye:-** Gudoomiyaha, Mudanayaasha iyo Shaqaalahaba waan salaamayaa marka ugu horeysa, waxa weeye lifaaqan qorshaha waxaan aad iyo aad uga mahad celinayaa Gudidda soo sameysay oo si hagar la'aana u soo sameysay, waxaa ka maqan Lifaaqan lifaaqyo uu tilmaamayo sida lifaaqyada E, F iyo G oo sadexdaa lifaaq midna lama socdo, anigu waxaan u arkaa arrinkan kii ugu muhiimsanaaa ee Goluhu abidkii qabto intii aynu joognay.

   Anigu waan soo akhriyay waxba kuma soo darin, sixitaan baan u dhexgalay, marka la eego ujeedada 5aad halkaa "in la dhiso oo kor loo qaado baan ka dhigay" oo waxaan ka saaray "iyo" halka ka dambeysa ee bartilmaameedyada kal duwan oo odhaneysa ***"Iyadoo laga duulay hadafka Golaha Wakiilada waxa uu u rogay ujeedadiisa, himiladiisa, iyo Hiigsigiisa mudada fogba in la bar tilmaameedsado wax qabad wax ku ool ah. Hadafku wuxuu fasirayaa halka loo socdo. Waxa xoogga la saaray in la hubiyo in UJEEDOOYINKU yeeshaan sifooyinka ah – in ay cayiman yihiin, la qiyaasi karo, la gaadhi karo, suura gal yihiin wakhti ahaanna la suura***

***galin karo ah"*** anigu halkaa waan ka badalay oo waxaan idhi ***"La gaadhi karo mudada suurgalkiisa"***

**Bartilmaameedka 1.5** hadafka 1[aad] oo ah ***"In si rasmi ah loogu turjumo xeer hoosaaka jira luqada ingiriisiga iyo in si rasmi ah loo ansixiyo aanu qaataan Wakiiladaku"*** halkaa wan garanwaayay, markaa waxaan ka dhigay ***"in loo ansixiyo Xubnaha Wakiiladuna qaataan"***

Qaar halkan waan ka saaray iyagaa isku noqonaya markaa halka ***"In ay kor u qaadis ku sameeyaan xeer hoosaadka si ay u horumariyaan habraaca sharci dejinta"*** waxaan ku daray ***"iyo awooda la xisaabtanka Xukuumada"*** waxaana ka saaray tan ku xigta ee ah *"In ay kor u qaadista iyo casriyayn ku sameeyaan xeer hoosaadka si ay kor ugu qaadaan la xisaabtanka xukuumada"* oo tan sare aayaan ku soo koobay, tan xigta ee ah iyana waxa loola jeedo garanmaayo sida kalmada ***"itaalka masilaadeed ee Golaha"***

**Bartilmaameedka 1:6** hadafka 2[aad] waxaan ka dhigay oo ku daray "in la Galiyo Websiteka Golaha kulamada Golaha iyo kuwa Gudiyada" oo waxaan ku daray ***"in la", markaa waxaasi way u badan tahay sida "Gali" "Samee"***

**Bartilmaameedka 1:7 hadafkiisa 1[aad]** waxaa ku taal "in dib u eegis ku same" markaa waxay noqoneysaa ***"in dib u eegis lagu sameeyo borotokoolada baarlamaanada kale"***

**Bartilmaameedka 1:8** iyana waa tii oo kale oo ku same baa ku taala, bogga 10[aad] halka ay u taaal "Bill" waxaan ka dhigay Xeerka Qabyada ah oo ku fiican Somali ahaan ilayn bill garanmeynee, sidoo kale waxaa ku taal gacanyaryaal bal maxaa loola jeedaa ma shaqaalahaa.

**Bartilmaameedka 3:1** halkii masilaadeedka ahayd way ku soo noqnoqoneysaa halkaa, talaabooyinka hadafka 3[aad] waxaan ka saraay "hadii" oo aan ku fiicnahayn waxaana ka dhigay "iyada oo" hadafka 5[aad] waxaa ku taal "iyo/ ama" markaa waxaan ka dhigay in "waa inay helaan Gudiyadu tababar ku filan" oo waan ka saaray Gudoomiyaha iyo waxa kale.

Waxaan kaloo ka saaray halka hadafka 7[aad] oo waxaan ku daray oo isla mid yihiin hadafka 6[aad], halka Bartilmaameedka waxaan ku badaly "Hadaf"

**Anigu halkaas intaas ayaan kaga baxayaa:-**

- Waxaan leeyahay waa wax qabad wanaagsan markaynu ka doodno ha la ansixiyo Qorshaha, waad mahadsantihiin.

7. **Md. c/raxmaan maxamed jaamac:**- Waxan mahadnaq balaadhan u soo jeedinayaa Gudidii soo diyaarisay qaabkan qorshahan hiigsiga 2013-2015 oo uu halkan inoo ka akhriyay Mudane C/raxmaan Cartan qabyo qoraaalkani waxa uu u baahanyahay dibu akhriyid iyo sixid runtii lagu sameeyo kaar ahaan waxa aad u liita astaamaynta iyo higaada 1 (panctuation respect) waayo waxaa ka buuxu qaladaad badan iyo Kalmado af ingiriisiya oo soomaali lagu qori karo, ayna jiraan weedho iyo Kalmado af-soomaali lagu qori karo oo lagagga kaaf-toomikaro ereyada af-ingiriisiga ah, waxan filayaa Gudida soo diyaarisay in aanay ahayn dadkii wax ku dhigtay af-, tusaale, erayga CSU wuxu ku xusanyahay bogaga 11, 15 iyo 16 waxa loola jeedaa Ururada Bulshada Rayidka ah oo loo soo gaabin karo (UBRA) oo ah Ururada Bulshada Rayidka ah, markaa CSU yada inta aad odhanayso waxad heli kartaa af-soomaali wanaagsan.

    waxaa halkan bartilmaameedka ama yoolka laga dhigay kalmad af-ingiriisi ah Goal **4.1,** markaa waxan odhan karaa looma aaba-yeelin markii la qorayay goal waa kalmad af-ingiriisi ah bogga 10, waxa la isticmaalay biilasha halkii laga isticaali lahaa Mashruuca sharci, way noogu qorantahay, xeer-hoosaadka, markaa in bill lagu soo qoro waxaad moodaa in aynu dib u noqonay halkii eray bixinta boga 3 marka laga hadlayao qiimaynta xaalada waxa la isticmaalay kalmadii marayganka ee swod ee guryaha u soo dhici jirtay sidii rr uda qabyo qoraalka n waxa ku qoran kalmadan wanaag waxa aw c/raxmaan u isticmaalay strangan dee strangan wanaagsan maaha strangtegan waxa uu c/raxmaan u isticmaalay bernugayl markaa aportunitisku waa fursado dangaraskuna waa khataro markaa af ingiriisiga hadaan ereyada la saxayn waxa wanaagsan in la iska daayo.

    Markaa waxaan leeyahay haloo aabo-yeelo marka wax la-qorayo, baarlamaan muta-calimiin baa ka buuxda, markaa waji gabax bay ku noqonaysaa xildhibaano muta-calimiina oo wax uun iska soo qor-qora, marka qof loo dhiibo wuu yaabayaa oo sidii primary student oo kale.

    Markaa qiimaynta xaalada marka laga hadlayo **lifaaqa f**. kuma lifaaqna waxaan ka hadlayaa boga 3aad qiimaynta xaalada waxa ku xusan **lifaaqa f** raac qiimaynta **xaalada lifaaq f** la yidhaa oo ku xusan halkan majiro barnugaly barjileec fursado iyo khadaro waxay ku qoranyihiin lifaaqa b markaa waa in la hubiyaa dadka aad u dirayso inayl waanu ka daba tagnay oo fwaanu soo waynee bage 4aad sida lagu sheegay waxa aw u baaahan yahay qabyo qoraal sababtoo ah halkani jijooyin baa la isticmaalayaa shan jiho strategy yeed baa la isticmaalayaa hadaba shantii jiho waxa laga soo qaaday waxa uu ku odhanay aa jihada hiigsiga sidoo kale shantii jiho strategeyeed ujeedooyinkia 1aad 2aad 3aad 4aad iyo 5aad dhamaantood waa in lagu bilaabo erayga ah kor u qaadid meel waxa la isticmaalayaa in la hagaajiyo meelna waxa la isticmaalayaa in hore loo mariyo, meelna waxa la isticmaalayaa in kor loo qaado.

Ujeedada labaad waxaa ku wanaagsan halka la odhan lahaa sharci dajinta, anigu waxan odhan lahaa kor u qaadida hanaanka sharci-dajineed in loo daayo in la horumariyo awooda Golaha, la xisaabtanka dawlada, daba galka haayadaha iyo daba galka wada shaqayneed ee dawlada, aan dawlada waynu wadanahay ee waxa la idhaa xukuumada waa dhadhaarka fulinta dowladu markaa marka dowlada la idhaahdo inaguna waan ku jirnaa markaa inagu isdaba galimaynaa ha laga daayo dowlada ooh ala idhaahdo xukuumada waxaann anuu halkaa ku badali lahaa waa ujeedada 3aad waana bage 4aad kor u qaadida awooda la xisaabtanka iyo daba galka haayadaha fulinta ama haayadaha xukuumada ujeedada 4aad in la horumariyo awooda golaha wakiilada ee shacabka waxaa halkan la idhi lifaaqa g waxyaalaha la kala dooranayo halkan abaaro cayiman oo wax ku oola ayaa lagu soo koobay lifaaqa g lifaaqa g marlabaad kuma jiro qabyo qoraalkan markaa ujeedooyinka lifaaqa 1,5 ee strategyka aynu hiigsanayno halkan ka eeg lifaaqa a ama c waxa boga 5 bartilmaameedka 1.1 ee awooda iyo kaabayaasha golaha horo marinta iyo kobcinta awoodayaasha kaabayaasha golaha een halkan talaabooyinbaa la qaadayaa si wanaaga iyo kaabayaasha golaha kor loogu laba qodob ayaan ku dari lahaa amniga goluhu waa muhiim anuu waxaan odhanlahaa muraayadaha dusheena waa dilaaga koowaad marka qaraxu dhaco waa in xabag lagu dhajiyaa si muraayaduhu markay xabagta leeyihiin waad dhibaata ah ma le laakiin markayna xabagta lahayn finiinbay kugu dilayaan.

Qodobka 2aad waxan odhan lahaa inkastooy xildhibaanadu neceb yihiin gawaadhida waa in la dhigo dabada sababtoo ah inkastoo dabada dhig hadii la idhaahdo wuu xanaaqayaa xildhibaanku markaa waa in dabada la dhigo ilaa lana loo sameeyo ilaalisa gawaadhida si aan waxba loo ga qaadan sababtoo ah marka qarax dhoco waxyaalaha wax dila waa gawaadhinda marka shidaal koodu is qabsado sameeya finiin sida muraayadaha shirgudoonku isagu barkin waa leehahay een waxa ka buuxa qabyo qoraalkan horumari samee in si halqof amar la siinayo oo kale meelo badan oo qobyo qoraalkan ku qoran horumari samee markaa waxaan soo jeedinayaa in loo daayo in la sameeyo sababtoo ah hadalkan same kobci horumari waxa ka wanaagsan in la sameeyo.

bage 6 bartilmaameedka 1.3 nidaamka xogta iyo tegnolagiyada icd waxaa ka mida la sameeyo saxaafada iyo golaha waxaan ku daray anuu in si joogto ah ama maalin la ah looga shaqeeyo mareegta golaha badanaa website ka waxa la isticmaalaa mareegta lana galiyo macluumaadka iyo hawlgalada u dambeeyey ee golaha wakiilada sobabtoo ah waxad arkaysaa wixii aynu qabanay oo aan la galin markaad is tidhaahdo wabsitka eeg markaa waa in la galiyo ama loo sameeyo hal bage oo maalin la ah waxyaalaha ka socda golaha aan.

bage 7 waxa ku qoran bartilmaameed 1.5 in dib u eegis lagu sameeyo lana casriyeeyo xeer hoosaadka markaa kalmada casriyayn waxan filayaa abdatin buu ula jeeday nin kii turjumay markaa casriyayntaas waa in lagu turjimo kalmad kale

sobobto ah casriyayn maaha abdating talaabooyinka la qaadayo xeer hoosaadka waxa halkan lagu qoray in la sameeyo guddi gaara oo ka shaqaysa xeer hoosaadka si ay dibu eegis ugu sameeyaan talana uga baxshaan sidii kor loogu qaadi lahaa waxka bedelna lagu samaynlahaa iyodoo hawlaheegii lagu jiraan markaa anuu waxaan odhanlahaa guddidaa gaarka ah waa in loo badiyo ama laga dhex xulo gudida joogta da ah guddida gaarka ah waa in uu gudoomiye ka noqdo gudoomiyaha gudida joogtada waayo waxyaalaha lag a bedelayo xeer hoosaadka waa shaqada gudida joogta da markaa gudoomiye hadii la doono waa in lagu daro xildhibaano khibrad u le afsoomaaliga iyo hal xil dhibaan oo sharci yaqaana waxaan soo jeedinayaa in gudida joogtada laga xulu maada ma u gudida joogtadu masuul ka noqonayo hadii ay ka maarmi waayaana ay u yeedhan.

bage 8 bartilmaameedka 1.6 qodobka 2aad waxa ku qoran gali waa wabsitka waa amaradii markaa waxan odhanla haa halaga dhigo inlagaliyo bartilmaameedka 1.7 wuxu leeyagat in dib u eegis ku same waxan odhan lahaa in dub u eegis lagu sameeyo dastuurku waxa uu ka qabo kuraasta dumarka iyo dadka laga tirade badanyahay dadka laga tirade badanyahay qolooyinka beesha dhexe ee aan anuu ka soo jeedo qaar baa odhanaya jilib hebel waa laga tira badan yahay marka danbe markaa tarabadnaantu lafdeedu qeexid bay u baahantahay.

Markaa dastuurku wuxu qabao labadaa bartilmaameed ee 1.9 iyo1.10 waa in loo eego dastuurka dalaabooyinka la qaadayo waa bage 9 in booqasho laba geesooda lagu daraasadeeyo kordhinta haweenka oo lala sameeyo dalalka afrikaanka ah iyo carabta baarlaamaankooda oo kala ah Uganda rawanda Suciidi Arabia iyo Qadar, sucuudi carabia iyo Qatar hadaa doonato dumuquraadiyadiiba waad ka hor timi, sababtoo ah dadkaa waxaa magacawda boqorka waala magacaabaa ee cid doorataayi ma jirto markaa cid aanay cidiba dooran hadaa tiraahdo wax baan ka soo qaadanayaa waa anuu waxaan ku raacsanahay bartilmaameedkii 1.1o waxan ku tarayaa bartilmaameedka 1.11 waxaan ku raacayaa pro naasir cali shire waxaan leeyahay qaabka dhismaha golaha wakiilada dib ha loogu noqdo dunida oo dhan ma jiro wax shirgudoon la idhaahdo waxa jira speekar aduunka markaan nu marnay ma jiraan two speekar hareeraha ka fadhiya hadaan doono mooshin baanu ku keenaynaa 1.11 qaab dhismeedka golaha in dib loogu noqdo bage 10 bartilmaamedka 2.2 talaabooyinka la qaadayo waxaa ku jira in laga dhex sameeyo xeer hoosaadka xeer cusub.

8. **Md. Ibraahim Jaamac Cali (Rayte):-** Marka ugu horeysa waxaan salaamayaa Shir-gudoonka, Xildhibaanada iyo Marti sharafta kale ee joogta Golalaha intaba, waxaan jecelahay inaan halkan hambalyo uga diro Gudidii soo waday hawshay ee Golaha soo gaadhsiisay iyo Md. C/raxmaan Yuusuf Cartan oo Warbixin fiican inaga siiyay qorshe hawleedkan aynu manta doodiisa ku jirno, sideedii sano ee aynu baarlamu aanka ku jirney aniga ra'yi ahaan waxay ila tahay ma jiro document ka muhiimsan kan oo Golahani ka doodey, waa

document hadeyno Goleheena ka dhigaya wixii dadku ka filayay, waad ogtihiin oo dadku wax badan bay iga tabayeen, qaabka iyo capacityga uu baarlamaanku u dhisanyahay ayaa ina awoodsiin waayay inay qabo wax badan.

Inaynu hirgalino oo ku dhaqano Qorshahan waynu karnaa, wax kalena kuma saabsanee waxa weeye sidii la inooga baahna awoodeena aynu u yeelan lahayn, aad baan u xiiseynayaa dooda Qorsha hawleedkan, waana mid si xirfad leh oo heer sare ah loo soo farsameeyay, waxaan jecelahay inaan taamto dhowr erey oo yar yar, si qorshahani u hirgalo waxay u baahantahay way ku taalaaye in Xeer-hoosaadkeena dib ugu noqono inuu ku fulinyahay in awoodaha ama waajibaadka ina horyaala fulin karno iyo in kale aynu eegno, dabadeedn ku saleyno fulinta qorshahn oo aynu ku shaqeyno kuna dabaqno Xeer-hoosaadkeena goolashan iyo hadafyadan aynu dhiganey.

Arrinta kale ee aan halkan ku jirin waxay tahay marka arrimaha oversightka oo kale oo baarlamaanka awoodihiisa ugu waaweyn ka mida ah, waana tan ugu mihiimsan saddexda Waafib ee Barlamaanku leeyahay ee kala ah Sharci-dejin oo ah xeerarka aynu soo saarno, Xeerarkana Xukuumada inoo soo gudbidbiso oo ah weakness ka baarlamaankeena mid ka mid ah inaynu xeerar abuurno, tan ka sii muhiimsan waxa weeye aduunyada oversightkeenu wuxuu ku dhow dhowyahay zero, waxa ugu badan aynu sameynaa waa inaynu wasiir halkan ugu yeedho oo intuu iska hadlo iska tago, ma jiro xidhiidh ku saabsan in Xeerarkii la hirgaliyay oo xukuumada inaga dhexeeya.

Waxa weeye Xeerarkii inteynu daba-galno wixii lagu shaqeyn waayay inteynu dib wax ka badal ugu sameyno daba-galno, halkan qorshaha way ku jirtaa, laakiin qorshuhu wuxuu u baahan yahay, uma baahna Xeer-hoosaadka oo kaliya inuu ku muuqdo, wuxuu u baahan yahay muujinaya awoodaha iyo hawlaha Baarlamaanka oo ah Xeer national ah oo aynu passed gareyno, oo xeerkaa lagu daro qaabka Parliament deals oo aan qabo gaabka ka maqan xidhiidhka inaga iyo dawlada, Markaa Xeerkaa anigu waan soo jeedinayaa.

Waxaan kaloo soo jeedin lahaa, Xeerkale oo muhiima marka dawladnimada laga hadlayo, oo aan jirin markaad Somaliland eegto, Xeerka waxaa la yidhaahdaa Xeerka Abaabulka Xukuumada ama (law of organization of Govertment) Shuruucdii dawladihii hore ee aynu dhaxalney wuu jirey, laakiin maaha mid manta jira, Xeerkaasi waxa muujinayaa qaabka ay xukuumadu u abaabulan tahay iyo sida ay u wada shaqeynayaa Xukuumada iyo baarlamaanku, markaa Labadaa Xeer waa Xeerar Muhiima oo ay tahay inaynu Qorshaha ku darsano.

Waxa kale oo iyana aan jecelahay, waxa inaga caawiyay in dajiyo Qorshana qof Haweena oo Mudo Xildhibaan soo aheyd, markaa waxaan garan kartaa

Xildhibaanka haweenka ee Canada ee la inoo soo xuley haweenku qiimaha ay muujineyso, markaa doodeedna waxaan jeclaan lahaa inaynu gole ahaan ka fakerno sidii haweenka oo tirade dalka ugu badan Golayaasha laga qeyb-galiyo, oo Mudane Gudoomiye Guddi gaara oo ka soo shaqeysa sidii haweenka Golayaasha wax baan looga siin lahaa soo eegta, anigu intaas ayaan ku soo gabo-gabeynayaa, waana mahadsantihiin.

**9:48 AM** **Maalinta Labaad ee Dooda Qorshaha Hiigsiga Golaha Wakiilada JSL.**

**Fadhigii 5aad** **Taariikhda 28/12/*2013***

**C/raxman Maxamed C/laahi (Cirro) Gudoomiyaha:-** waxaynu sii wadeynaa Doodii inoo socotey ee Qorshaha Hiigsiga Golaha ee 3da sano, mudanayaashu waxay codsadeen in loo qeybiyo nuqulka ingriiska ah, markaa xoghaynu mudanayasha ha u qeybiso, waxaana dooda ku soo dhoweynayaa mudane.

9. **Md. Cali Maxamed Aadan (Calibarre):-** Asaala Caleykuma waraxmatulaahi wabara-kaatuhu, Gudoomiye iyo Mudanayaal runtii waxa weeye qorshahan qabyo qoraalka ah wax badan oo ii dhinaa wuu jiraa, marka ugu horeysaa waxaan u arkaa inuu yahay arrin loo baahnaa oo muhiim u ah Golaha, intii aan ka gaadhey turjumaada Somaliga ah ingriiskiisa saakaba naloo qeybiyoo lama akhriyin, af Somaliga marka wax lagu turjumona qal-qalooc badan buu yeeshaa oo wax badan baa khaldama, horta strategyadan wakhti dhaaftay lama yiraahdo lagam dabo tago oo bari bay ii ahayd, sanadkii sagaalaad baynu fooda la galnay hada ka hor baa horta loo baahnaa, iminka waxay ila tahay inta inoo hadhay insha'alaahu waa barnaamij aad iyo aad muhiim ugu ah.

   Hadii aan hoos ugu daadego waxa weyn oo aragti ah oo aan wax kaga badali karo intaan akhriyay maan ka soo saarin oo runtii aad baan ula dhacay meelo yar oo in la cadeeyo u baahan iyo meelo u baahan in kalmada kale kaga haboon tahay, beyjka 7aad ee Afsomaliga halka talooyinka ee ah "in loo dejiyo course hordhac oo dhameystiran iyo tababar khaas u ah mudanayaasha cusub" markaa Qodobka waxaan odhan lahaa kuwa hada joogana way u baahan yihiine, si mudanyaasha jooga iyo kuwa cusuba ay u koobsato waxaan ka dhigi lahaa in loo daayo Mudanayasha oo kaliya oo cusub laga saaro.

   Xubintiisa labaad ee ah "in tababar lagu siiyo xeer hoosaadka Golaha" waxaan ka dhigi lahaa "in tababar lagu siiyo Xeer-hoosaadka Golaha, Dastuurka iyo Shuruucda kale ee dalka, waayo Goluhu wuxuu ku shaqeeyaa dastuurka iyo Xeerarka sharci dejinta ka soo baxay ee madaxwenuhu saxiixay ee dhaqan galay inaynu ilaalino oo dabagalno fulintooda iyo in lagu shaqeeyay, markaa

waa inay mudanayaashu la socdaan Xeerarkaa dhaqan galay, waana in xildhibaanadu la wada socdaan oo mawada haystaan.

**Isla beyjkaa bartilmaameedka 1:5** saxid bay u baahantahay "in si rasmiya loogu turjumo Xeer hoosaadka jira af ingriiska iyo in si rasimiya loo ansixiyo aan qaataan wakiiladu" markaa halkaasi saxid bay u baahantahay, xubintiisa 2aad oo odhaneysa *"in la sameeyo gudi u gaara ka shaqeynta xeer hoosaadka si ay dib u eegis ugu sameeyaan talona uga soo baxshaan sidii kor loogu qaadi lahaa wax ka badalna ku sameeyaan lahaa iyagoo hawlohoodana ku jiriyaan"* **qodobkaa waxaan odhan laha Xeer-hoosaadka hadii wax laga qabanayo waa Awooda Gudidda Joogtada ah** hadii wax laga badalayo, hadii la turjumayo iyo hadii wax lagu tababarayo, waa shaqadii Gudidda Joogtada ah ee iyaga ha loo daayo.

Kalmada itaal masilaadeed waan fahmiwaayay maxaa loola jeedaa luqad ahaan kalmadaasina fasiraad bay u baahan tahay, **bartilmaameedka 1:7** "in kor loo qaado waaxda protocolka ee Golaha" halkaasina waxay u baahantahay in Waaxda Protocolka la cadeeyo, waayo procedure aan la hayn hadii la sameynayo cadeyn bay u baahan tahay, Bartilmaadeedka 1:9 halka ay ku qoran tahay in la kordhiyo kuraasta ay dumarku ku leeyihiin kuraasta barlamaanka waxaan ku dari lahaa iyo Dadka laga tiro badan yahay oo ka maqan, markaa dadka laga tiro badan yahay ha lagu daro ma dumarka kaliyaynu wax loo kordhinayaa markaa iyagana ha lagu daro dariiq bay wada marayaane.

**Gudoomiye hadii aan eegay Qorshahan:-**

- Hadii aan eegay intaasuun baan xoogaa ka gaadhsiiyay sida kale aad buu u fiican yahay cida ka soo shaqeysayna waan u mahadnaqayaa, waana muhiim ha la ansixiyo.

10. **Md. Baar Siciid Faarax:-** way salaaman yihiin Shir-gudoonka, Mudanayaasha iyo saxaafadu, Gudoomiye iyadoo la tixgalinayo mujtamaca intooda u badan oo haweenka ah oo ka maqan golayaasha Qaranka, tiradaa umadii u badanina ayna xaq u lahayn inay ka maqanaadaan talada dalka meelahan lagu gorfeynayo, sidaa darted aad iyo aad baan u soo dhoweynayaa Strategyadan ay noo horseeday inantu baarlamaanada ku jirtaa, umaduna waxay aad iyo aad ula yaaban tahay in inan kaliyi ahi dhex fadhido Golaha marna aan laba ku ahayn.

Sidaa darted waxaan soo jeedinayaa in Haweenka loo qoondeeyo Kooto 30% ah arrinkaa, ragbaa qoslaya, waxaa la yidhi ninbaa Burco loo soo diroo markaasay daba u jeedisay markaasu yidhi burcoy ama daba sii jeedi ama soo jeedi arrintii la isoo faray waan sheegayaa, markaa waligiinba qos qosla haweenku way soo jeensanayaan, markaa haweenka tirade 30% ah waa in haweenka loo qoondeeyo doorashada soo socota iyadoo laga bilaabayo, xaqna ay u leeyihiin, intaas uun baan anigu ku darayaa, waad mahadsantihiin.,

11. **Md. Ibraahim Axmed Haybe:-** Marka hore waad salaamantihiin, warqadan ina hortaal marka hore cidii soo diyaarisay aad baan ugu mahadnaqayaa, anigu laba arrimood uun baan ka hadlayaa guud ahaana in la qaato anigu waan ogolahay, marka hore Afsomaliga ay ku qoran tahay in dib loo eego waan ku talinayaa waayo meelo badan ayaan la fahmeyn waxa loola jeedo siduu iminka Xildhibaan Calibarre tilmaamayay taasi waa tan koowaad.

    Waxaan kaloo ku soo darayaa oo ku talinayaa in loo Magacaabo oo loo sameeyo Guddi Cusub oo aan ku meel gaadh ahayn oo ah Gudi caadiya oo noqota Guddidda 9aad oo hawshaa Qorshaha iyadu u qaabilsan golaha wakiilada, oo dabagasha Warbixina Golaha ka soo siisa Kal-fadhi kasta Qorshana aynu dhiganey wixii laga qabtey oo Gudiddaa la yidhaahdo Gudidda Qorsheynta, arrintu maaha intaynu warqada ka doodno meel iska dhigno, waxay u baahantahay in hawshaa si rasmiya u dabagasho.

    Waxaan kaloo ku darayaa oo halkan ku qoran in la sameeyo liberary mudanayasha iyo shaqaaluhu wax ku akhriyaan, waayo waxaa ku qoran in Xoghaymuhu Gudiyada ka caawiyaa hadba waxay ka hadlayaa, waxayna uga caawin karayaan hadii la helo liberary sidaa awgeed waynu kala dhantaalanahay inteynu liberary ka helayno, markaa waxaan ku talinayaa in deg-deg loo sameeyo Liberary, intaas ayaan ku soo gabo-gabeynayaa, waad mahadsantahay Gudoomiye.

12. **Md. Xaashi Xuseen Caabi:-** waad salaamantihiin intiina halkan fadhida ee Baarna ka mid tahay dabcan, Gudiddii soo sameysay Qorshahan aad baan ugu mahadnaqayaa hawl wanaagsan bay soo qabatey, si wanaagsan baa loo sameyay inkastoo nuqulka ingriiska iyo tan afsomaliga ah kala duwan yihiin meel badan oo ay u baahan tahay in dib yar loogu yara noqdo, hadalo isku soo noq-noqonayaana way jiraan, markaa waxaan odhan lahaa bal ha la isku soo hagaajiyo oo turjumada afsomaliga iyo ingriiska ha la isa soo waafajiyo, waayo

meelo badan oo ingriisku si u sheegayo ayay tan afsomaliga ah meelo kale martey oo sidey ahayd aan looga turjuimin.

Hadaynu soo qaadano qaab hawleedka Qorsha, Afsomaliga waxaa ku qoran qaab hawleedka qorshaha wuxuu qeexayaa seeska ma guuraanka ah, afingriiskuna wuxuu qorayaa fundamentals oo Mabaadiida ma guuraanka, somaligiina seeska ma guuraanka ah baa lagu turjumey, markaa isma waafaqsana labada luuqadood, tan ingriiska ayaa ka miisaany culus oo ka fiican, waxaa kaloo meesha ku jira **"Mission"** hadaynu soo qaadano waxa weeye waa institution hawl-gudanaya markaa hawsha uu gudanayo hadafku halkuu ka yimi weeye, afsomaligu Goals hadaad eegtona isna hadaf buu mu micneeyay oo wixiiiba hadaf ayuu ku wada turjumey, Markaa Mission ku hadaf wuu ka yar balaadhan yahay, waxa weeye waxa uu doonayo inuu fuliyo ama fariin uu gudbinayo, Markaa waxaan odhan lahaa Mission hadaf yaanu noqonine ha laga dhigo **"Muhiimada"** oo taas ayaa ugu dhow oo ah muhiimada uu u taaganyahay Goluhu.

Halka **Himilada** iyadu way fiicantahay inkastoo **aragti** ay kaga fiicneyd, waayo afingriisku **Vision** ayuu ahaa, waliba ok weeye laakiin aragti baan odhan lahaa, halka uu **qiyamka** yidhi waxa weeye kalmada afcarabi ah oo waliba Jamaca ka hadleysa, maaha mid qudha, waa wax la isku soo wada ururiyay, Markaa anigu halkaa waxaan odhan lahaa "**Dhaqanka Suuban"** ha laga dhigo oo **Qiyam** ha laga daayo, waayo akhlaaqdii iyo daacadii waa Dhaqamka suuban, oo lagu micneeyay **"Values"** markaa saddexdaa sidaa ayaan u badali lahaa oo waxaan ka dhigi lahaa sidan:-

**(Mission = Muhiimada)  (Vision = Aragti) (Values= "Dhaqanka Suuban)**

Kalmadaha aduunka waa la kala qaataa, markaa aaga Strategyga haday iyadoo afingiriis ah qaadano laakiin hadii aynu si kale sida halkan ujeedada kowaad waxaa ku sii qoran halka 5ta u jeedo sida ingriiska ku qoran way kala duwan tahay, markaa wuxuu ku qurux badnaan lahaa inaynu ka dhigno "waa 5 meelood ama 5 aag oo mudo dheer sii soconaya waana meelaha Golaha Wakiiladu Xooga saari doono" in sidaa loo micneeyo sida afingiirska ku qoran.

## Markaa waxaan soo jeedinayaa:-

- Wax badan baa khaldan Macnaha, markaa hoos ha loogu daadago yaan kalmad kalmad lagu micneyn, si wanaagsan ha la isula eego oo micnaha

si wanaagsan ha la isugu turjumo, intaas ayaan ku soo gabo-gabeynayaa, waad mahadsantihiin,

13. **Md. Axmed Ducaale Bulaale:-** horta anigu strategy plankan la soo qorey inshaan wada mariyay, runtii waxaan is idhi wakhti horey aheyd inaad heshaan marka laga hadlo Golaha iyo Karaamadiisa sida uu u shaqeynayo, aad baan u soo dhoweynayaa, marka laga yimaado afsomaliga iyo macnaha kalmadaha, anigu markii aan akhriyay nuxurkiisa wax aan ku kodhiyo waan waayay, laakiin, qodob iyo laba ayaan is idhi waa lagu dari karayaa.

Tan 1aad waxaan odhan lahaa strategic planku waxan la yidhaahdo Golenimadeena ee Gole Qaran oo talada Qaranka meel kaga jira nahay oo Golenimada macnaheeda loo dhiijiyo waan ku dari lahaa, waxaan kaloo ku dari lahaa tan 2aad, waxan la yidhaahdo doorashooyinka, oo doorashooyinka aynu nidhaahno mar walba ha la qabto iyada Garoonkeedu markasta waa qabyo, sababaha ay qabyada u noqdaane waxa weeye marka hore Doorashooyinkii ciidaas ayay ka badan yihiin, waxaan leeyahay ha la kobo Doorashooyinka oo aynu Garoon fiican u xaadhno, oo laba meelood ama hal meel aynu isugu celino, waayo doorasho aan qabano markay soo dhowaato iyadoo qabyo ah, Markaa doorashooyinka faraha badan ee dhaqaale baxa badan keenaya aynu yareyno.

Qodobka kale ee aan ku darayaa waxa weeye, Goluhu inaanu noqon had iyo jeer mid ka hadla waxa la soo dhaafaye, xaaladaha marba soo kordha waa inuu dood iyo tashi deg-dega ka yeeshaa oo wixii wiiga iyo saacadihii ina dhaafey waa inaynu xaaladahaas oo kale markiiba wax iska weydiino, iminka tusaale taleex waxbaa ka dhacey kameynuna hadal, markaa inaynu markasta feejignaano (aware) noqonaa.

Sidoo kale waxaan ka hadlayaa inaynu qeexno kal-fadhi kasta horta maxaynu qaban kareynaa, oo aynaan kal-fadhigii iska tixin ilaa 20 qodob, aynu marka hore nidhaahno maxaa inoo mudan inaynu kal-fadhigan qabano oo muhiima, oo si fiican loo jilciyo ilaa inteynu ka naqaano kal-fadhi kasta waxaynu qabananeyno.

**Waxaan ku soo gabo-gabeynaya:-**

- Mawduucani aniga mid muhiima ayuu igu muuqda, ereyada iyo kalmadaha oo la saxo ka dib aynu kal-fadhigan ku hawlgalnee Si deg-deg ah ha loo ansixiyo, waadmahadsantihiin.

14. **Md. C/qaadir Jaamacd Xaamud:-** Shir-gudoonka, Mudanayaasha iyo Saxaafada marka hore waan wada salaamaya, salaantaa wadareed ka dib, Runtii aad iyo aad buu u fiicanyahay Qorshahan horeyna u ahayd inaynu helno oo loo hawlgalo, alxamdulilaah mar hadii maantaba la bilaabey, Gudiddii ka soo shaqeysay waan u hambalyaynaya.

Hadafka Goluhu waa inuu ka turjumo Wakiilnimada Shacabka soo doortey, runtii aad baan u soo dhoweynayaa hawshan inaynu ku shaqeyno manta wixii laga bilaabo oo aynu hawsheena wedano waa mid mihiima, in badan baana dusha ka soo maray oo waxyaabo baedan baa igu taagnaa oo xaafada dhinacayaga biyo la'aan baahsan baa ka jirta oo booyadihii baa biyihii joojiyay, taasna inaynu ka hadalno oo Gudidda arrimaha Bulshadu ka hadasho weeye, qeyb dhan oo xaafado magaalada ka mid ah baa biyo la'aan ka taagan tahay, khaladadaad wuxuu dhici karaa oo la sixi karaa, laakiin iyagu inay biyaha joojiyaan maaha.

Runtii aad iyo aad baan u soo dhoweynayaa strategy gan waa wax loo baahnaa, ha la ansixiyo, anigu intaas ayaan ku soo gabo-gabeynayaa, waadmahadsantihiin.

**Gudoomiye Baashe Maxamed Faarax:-** *Mudanayaashii dooda is qorey intaasey ahaayeen oo way dhamaadeen, Hadal Qoraalka ayaa dood soo qori doona oo isku soo ururin doona baritone loo qeybinayaa Mudanayaasha, iyadoo isla bari loo codeyn doono Xeerka Booliiska oo Golaha Guurtida ka soo noqdey, Fadhiguna sidaasu ku xidhan yahay.*

***The House Adjouned at 11:19 AM by the speaker of the house***

| | |
|---|---|
| **Cawad Cali Maxamed** | **C/risaaq Siciid Ayaanle** |
| **Agaasimaha waaxda Hadal Qoraalka G/Wakiilada** | **Xoghayaha Guud ee Golaha wakiilada JSl** |
| ---------------------------------------------------- | ---------------------------------------------- |